

# Repair of Atrioventricular Septal Defect (AVSD)
## Hagaajinta Duleelka Darbiga Wadnaha AVSD




© 2012 The Children's Heart Clinic

**Lub Plawv Li Ib Txwm**



Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404


© 2012 The Children's Heart Clinic

**Hagaajinta Duleelka Darbiga Wadnaha ama AVSD**

Repair of Atrioventricular Septal Defect (AVSD)

Qalitaanka lagu hagaajinayo Atrioventricular Septal Defect (Duleelka Darbiga Wadnaha ama AVSD) waa mid ay ku kala xirmayaan xiriirka ka dhexeeya qalbacyada hoose ee wadnaha (cilladda duleelka qalbaca), iyo inta u dhaxaysa qeybaha kore (ciladda duleelka qeybta kore). Hagaajinta AVSD waa in lagu sameeyo dhallaanimada qiyaastii ilmaha oo jira 4 ilaa 6 bilood. AVSD waxaa badanaa si meelgaar ah loo hagaajiyaa labada sano ee hore ee nolosha ilmaha. AVSD qeyb ah waxaa badanaa la hagaajiyaa marka ilmuhu jiro 2 ilaa 3 sano, sababtoo ah waxaa ka maqan qayb ka mid ah VSD.

Qalliinka intuu socdo, fursita bartanka shafka (jeexid ah qeybta dhexe ee shafka) ayaa la sameynayaa. Waxaa ilmaha yar lagu xirayaa wadne iyo sambab macmal ah (mashiin ah wadne-sambab). Qeybta midig kore ee wadnaha ayaa la furayaa oo daboolka caadiga ah waa la eegayaa oo la tijaabinayaa wuxuu daadinayo (dhiig-daadin). Hagaajinta buuxda iyo tan meelgaarka ah ee AVSD waxaa jirta qeyb ah ventricular septal defect (cilladda duleelka qalbaca). Haddii uu weyn yahay, sharooto ka sameysan xuubka Dacron® ayaa lagu hagaajinayaa cilladda (oo waxaa la yiraahdaa farsamada labada xuub ee sharootada ah). Haddii uu VSD yar tahay, waxaa lagu xiri karaa qodobbo tolliin ah (oo waxaa la yiraahdaa farsamada xuubka halka sharooto ee beddelan). Marka VSD la xiro, tolliinka waxaa la dhex mariyaa murqaha daboolka ee caadiga ah si loo xiro inta u dhexeeya VSD iyo daboolka dhiigga celinaya. Daboolka waxaa la tijaabinayaa marar badan si loo hubiyo in si sax ah loogu kala qeybiyey hawsha daboolka iyo murqaha kale ee kala duwan. Marka la dhammeeyo, qeyb ka mid ah xuubka wadnaha ee ilmaha (kiish wadnaha ku wareegsan) ayaa ku dheggan qeybta kore (qalbaca sare) oo murqaha daboolka waa liifad oo kale, oo waa inta u dhaxaysa halka ay ku kulmaan dabool ah murqo badan. Waxa la sameynayo waa hagaajin ah qeyb ahaan AVSD. Marka la kala qeybiyo, labad nooc oo ah dabool murqo ah ayaa la tijaabinayaa celintooda dhiigga. Waa la tolayaa markaas, haddii loo baahdo, si loo yareeyo dibu-soonoqoshada dhiigga. Hagaajinta AVSD, daboolka muruqa ayaa yeelan doona "jeex", ama meel u kala qeybsan mid ka mid ah murqaha kala duwan (liifadaha dusha kore). Tolliinka sababtiisu waa in lagu xiro jeexnaanta muruqa, si loo hubiyo in uu ku filan yahay cabbirka ilmaha duleelka saxda ah ee muruqa cabbirkiisu yahay. Daboolka ayaa markaas la tijaabinayaa oo tolliin dheeraad ah ayaa lagu sameynayaa si loo yareeyo dibu-soonoqoshada dhiigga. Marka la dhammeeyo, waxa soo hadra xuub ayaa lagu sharooteynayaa wadnaha si loogu xiro cilladda duleelka qeybta kore ee wadnaha (ASD) oo qeyb ka ah AVSD.  Qalliinka ka dib, dhiigga aan lahayn ogsijiinta ee ah "buluugga", ayey kala baxeen dhiigga ogsijiinta leh ee "guduudan", sida wareegga caadiga ah ee wadnaha.

**Hawlgalka Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib:**

- <u>Wakhtiguu Qaadanayo Qalliinka</u>: 4 saac
- <u>Leymanka Caadiga</u>: Carruurta intooda badan waxa ay ku noqon doonaan Xarunta Daryeelka Wadnaha ka dib qalliinka iyaga oo ku tuubbo ah neefsashada, mid halbowle oo lagula soconayo cadaadiska dhiigga, mid kale oo ah xididdada (mid ah faleebbe daawada laga qaato iyo in dhiig laga qaado), faleebbe bannaanka ah, tuubooyinka xabadka ah oo dheecaanka looga daadinayo, xar-gaha garaacista meelgaarka ah, iyo kateetaraha Foley oo ah kan kaadidu geleyso.
- <u>Soo-kabashada Caadiga ah Qalliinka Ka-Dib</u>: Tuubada neefsashada ayaa badanaa laga saarayaa 24 saac ilaa 48 saac ka dib qalliinka. Tuubada halbowlaha badanaa waxaa laga saarayaa maalmo ka dib, marka laga joojiyo faleebbaha. Tuubada xididada bartamaha waxaa laga bixinayaa marka laga joojiyo ee aan loo baahneyn daawada iyo dhiigga laga qaadayo faleebbaha ama IV. Tuubooyinka xabadka waxaa laga saaraa 24 ilaa 48 saac ka dib qalliinka, markuu yaraado dheecaanka soo baxaya.
- <u>Muddada Seexinta Isbitaalka</u>:  Wuxuu ilmuhu isbitaalka joogayaa badanaa 5 maalmood ka dib marka la hagaajiyo cill adda duleelka wadnaha

**Qaadashada Daawooyinka Guriga:** Carruurtu waxa ay u baahan karaan hal daawo ama in ka badan in ay guriga u qaataan ka dib hagaajinta AVSD sida:

- Daawada biyaha saarta (Lasix) si looga xakameeyo dareeraha
- Wax ah dhimista culeyska wadnaha (Enalapril, Captopril)
- Infakshanka bakteeriyada prophylaxis oo ah 6 bilood ka dib muddo dheer haddii uu jiro dareere ka socda daboolka ama qalabka daboolka ah ee loo geliyo.


© 2012 The Children's Heart Clinic